



EDEN PRAIRIE SCHOOLS

2019 / **strong schools.
safe schools.
successful students.**

EPVOTE2019.ORG

14-ka bisha May, 2019, Waxaa bulshada degan Eden Prairie laga codsan doonaa in ay u codeeyaan isbedello la doonayo in lagu hormariyo jawiga iyo amniga waxbarasho ee iskuuladeena. Aftidaan oo ka kooban hal su'aal, kuna salaysantahay qorsho iyo cilmi baaris soo socotay muddo seddex sanadood ah oo ku saabsan:



• In ardayda ay da'ddodu tahay 4-sanno loo wareejiyo dugsiyada hoose (Elementary schools) **si loo hubiyo in caruur badan loogu diyaariyo fasallada Xanaanaadda (Kindergarten).**



• In sare loo qaado jawiga waxbarasho ee dugsiyada dhexe iyada oo la adeegsanayo in ardayda dhigata fasallada 6-aad laga wareejiyo dugsiyadda hoose loona gudbiyo dugsiyada dhexe si markaasi ay u helaan jawi waxbarasho oo da'doodu ku haan.



• Si loo gaaro horumar dhanka waxbarasho oo heer-sare ah waa in dib-u-habeeyn loogu sameeyo fasalada iskuullada degmada oo markaasi la suurta-galiyo jawi waxbarasho oo wanaagsan iyo walibo kobciso tadiinta shakhsi ahaaneed ee ardayda.



• Horumarinta amniga dhamaan iskuulladda ayada oo la kordhinayo waxyaabaha sida muraayadaha aadka u adag, qalabka la isticmaalo hadii ay dhacdo xaalado sida khalkhal ama amni darro, nidaamka isgaarsiinta gudaha iyo amniga dibadda.

Qiime intee la eg ayaa ku baxaya?

Hadii ay dadka codaynaya ansixiyaan aftidaan, gudigga iskuullada waxay u ogolaan doontaa in ay dalbadaan mizaaniyad gaaraysa 39.9 malyan si ay u maal-galiyaan dhismaha iyo agabka loo baahanyahay. Saamaynta dhanka canshuuraha ah ee aftidaan ayaa ah in guri kasto ay ku soo aado canshuur dheeraah ah oo u dhiganta \$6.50 bil walbo.*

* \$397,400 qiimaha guryaha degmada



Qodoba Xaqiiqooyin ah



Degmada Eden Prairie, ayaa marka la barbar dhigo degmooyinka kale ee dariska la ah, ayaa ah kuwa canshuuraha ugu hooseya ee laga qaado guryaha.



Dugsiyada Eden Prairie waxay si joogto ah u heleen abaalmarinno heer sare ah oo ku saabsan daahfurnaanta maaliyadeed iyo xisaabaadka.

98%

waalidiinta ayaa u aqoonsaday in waxbarashada degmada ay tahay mid heerkeedu aad uu u sareeyo.

99%

waalidiinta degmada ayaa rumeysan in bulshadeenu ay ka faa'iido maal-galinta iskuullada.



Hadii ay cod-bixiyaasha ay ansixin waayaan aftida

- Qorshaha horumarinta aminga iskuullada ayaa dib u dhici kara.
- Central Middle School- iskuulkani oo la dhisay 60 sano oo aanan dib-udhis weyn lagu sameyn mudda 25 sano-ayaa waxaa sii socon doonaa culeyska dhanka xaxmiga wadada, jawalka qadada oo mararka qaar bilaabanayo 10 am iyo walibo goonaha barmaamijyada cayaaraha oo aanan ku filnayn iskuulka.
- Ardayda oo aanan sidii la rabay u heli doonin goobo waxbarasho oo kala duwan arintani oo sababi karto in ay macalimiinta aysan fursad u helin in ay tijaabo noocyada kala duwan ee waxbarashada.
- In ay ardayda, bulshada iyo barmaamijyada kala duwan ay u loolamaan fursada iyo boosaska xadidan ee goobaha cayaaraha.
- In tirade ardayda ah ee dhiganaysa ama lagu qaabili karo barmaamijka dhalaanka ay xadiidnaato.



HALKEE LAGA CODEEYAA Cod-bixiyaasha waxay ka codeyn karaa mid ka mid ah goobaha laga codeeyo- si aad macluumaad dheeri ah u heshid oo ku saabsan goobaha booqo barta www.mnvotes.org ama wac 952-975-7072. Qofkii doonayo in uu xili hore codeeyo, wuxuu codeyn karaa March 29.



MACLUUMAAD DHEERI AH

- Booqo www.EPVote2019.org
- Email EPVote2019@edenpr.org
- Wac 952-975-2498

Macluumaadkani waxaa soo diyaariyay Iskuullada Eden Prairie. Macluumaadkani kuma saabsano musharax ama su'aalaha codeynta doorashada.